

Waad ku mahadsan tahay xiisaha aad u muujisay daryeelka Allina Partners Care (APC). APC waa barnaamij gargaar dhaqaale oo mara Allina Health oo kaa gargaari kara kharashyadaada ama biilashadaada Allina Health. Halkan waxa la socda oo aad ka heli doontaa warqadda codsiga APC. Fadlan maskaxda ku hay marka aad buuxinaysid codsiga:

- APC ma aha caymis caafimaad, balse waa gargaar dhaqaale oo loogu talagalay biilashadaada Allina Health kaliya. Sababta oo ah ma aha qorshe caymis caafimaad, APC kaliya waxay dabbiri kartaa adeegyada toos loogu soo dalaco Allina Health. Tan macnaheedu waxa weeye waxa kaliya ee ay gargaar ka geysan kartaa kharashyada ka imanaya goobaha Allina Health, iyo kharashyada ka yimaadaa dhakhaatiirta u shaqeeya Allina Health.
- APC waxay kaa gargaaraysa biilasha ama kharashyada adeegyada caafimaad ahaan lagama-maarmaan ah, kaamana gargaarayso kharashyada dawooyinka dhakhtar kuu qoro, adeegyada tafaariikhda, ama adeegyada doorasho ah qaarkood.
- Marka aad buuxinaysid codsiga, waa muhiim inaad na siisid caymiskaaga hadda, dakhligaaga, iyo macluumaadka maalkaaga, xiitaa haddii xaaladdaadu isbeddeshay ka dib markii aad gashay kharashyada ay kugu leedahay Allina Health. U-banaanaanta APC waxay ku saleysan tahay dakhliga qoyskaaga iyo maalkaaga ee hadda.

<b>Fadlan shaxankan u isticmaal liis hubin marka aad buuxinaysid warqadda codsiga ee halkan la socota.</b>	
<b>Qaybta 1</b> Macluumaadka Codsadaha	<input type="checkbox"/> Codsiga dhammaan waa in la buuxiyo – <b>Kulli sanduuqyada waa in la buuxiyo.</b> <input type="checkbox"/> Macluumaadka ku qoran codsiga waa inuu <b>SI SAX AH</b> ula mid yahay dukumentiyada taageero ah! <input type="checkbox"/> Waa in codsiga uu saxeeexo oo taariikheeyo codsadaha iyo la is qabaha/wehelka kale (fiiri qaybta 2).
<b>Qaybta 2</b> Ku-darista Kugu- tiisane	<input type="checkbox"/> Kugu-tiirsaneyaasha ka weyn 18 jir kaliya waxa lagu dari doonaa tirada qoyska haddii ay ku jireen cashuur-celinta sannadkii hore. <i>Fadlan sidoo kale ku qor codsiga inay yihiin kugu-tiirsane.</i> Ilmo kasta oo ka weyn 18 jir wuxu u baahan doonaa inuu codsi gooni ah u gudbisto Allina Partners. <input type="checkbox"/> Haddii aad la nooshahay wehel oo uu idinka dhexeeyo ama isu leedihiin ilmo aan qaangaadh ahayn, waxa aanu dhakhligiina ka soo qaadi doonaa dakhli qoys. Fadlan qofka wehelka ah iyo ilmaha ku qor codsiga, oo bixi dhammaan dukumentiyada dhaqaale ee taageero ah.
<b>Qaybta 3</b> Cadeyn Dabbirid Caymis	<input type="checkbox"/> Haddii qof ku qoran codsiga uu hadda haysto dabbirid daryeel caafimaad, fadlan sheeg taas oo soo dir koobi ah xagga hore iyo dambe ee kaadhka caymiska caafimaadka. <input type="checkbox"/> Haddii qof ku qoran codsiga yahay bilaa caymis, waxa aanu u baahan nahay go'aamin qoran oo ka timid MA iyo/ama MNCareMedical Assistance iyo/ama MN Care.
<b>Qaybta 4</b> Cadeynta Maal ah ama Noqon Kara Kaash	Waxa aanu u baahan nahay koobiyo fiican ( <b>ha soo dirin asalka, lama soo celin doono</b> ) oo ah kuwan soo socda: <input type="checkbox"/> Waraaqo xisaab bangi (statements), saamiyo/maalgashi (stocks/bonds), CD-yo, xisaabo maaligalin suuq (money market accounts). <input type="checkbox"/> Fadlan soo dir waraaq xisaab oo bishii ah oo dhammeystiran. Waa inuu ku jiro magacaaga, magaca bangiga ama goobta, dhammaan wixii galay ama laga saaray, baaqiga hadda ku jira iyo taariikhda. Warqad soo koobitaan bangi oo ah xisaabtaada lama aqbali karo. Macluumaadka lagu lagu qoro Qaybta 4 waa inuu si sax ah ula mid yahay waxa ku qoran dukumentiyadaada taageerada ah.
<b>Qaybta 5, 6, 7, 8</b> Cadeyn Dakhli  * Soo dir koobiyada dhammaan inta ku khuseysa	<input type="checkbox"/> Koobiyo ah qaybta dambe ee 2-dii jeeg mushahar ee ugu dambeeyay ama warqad cadeyn ah ka timid shaqo-bixiyahaaga oo ay ku qoran tahay mushaharka lagu siiyay 2 bilood (haddii aad shaqeysid). <input type="checkbox"/> Cashuur-celinta sannadkii hore ee federalka. <input type="checkbox"/> Haddii codsadeyaashu aanay lahayn wax dakhli ah, waa in la buuxiyo hadal taageero – Soo wac xafiiskayaga si aad koobi u heshid haddii loo baahdo. <input type="checkbox"/> Waxa aanu u baahan nahay dukumentiyada taageero ah oo ku saabsan wixii ah dakhli ee lagu qoray qaybahan. <input type="checkbox"/> Haddii aad shaqada ka fadhiisatay oo aad qaadatid “social security,” lacag hawlgab ( pension) ama lacag sannadeed (annuities) fadlan macluumaadkaas ku qor Qaybta 7 oo soo dir cadeyn ku saabsan dakhliga guud. Waraaqo cadeyn bangi oo muujinaya lacagta la dhigtay looma aqbali karo inuu yahay cadeyn dakhli.

Haddii aanad hubin dukumentiyada ay tahay inaad ku soo dartid codsiga, ama haddii aad u baahan gargaar kale oo kasta oo lagaa siiyo codsigan, fadlan nagala soo xidhiidh lambarada teleefonka ee kor ku qoran. Waxa aad koobi ah codsigan ku soo dejisan kartaa lugaha Ingiriis, Isbaanish ama Soomaali inta aad gashid [www.allinahealth.org/financialassistance](http://www.allinahealth.org/financialassistance).

Si daacadnimo leh,  
Takhasusleyaashaada Daryeelka ee Allina Partners

# Daryeelka Allina Partners Care

## Codsiga Gargaarka Dhaqaale

**MUHIIM: HADDII AAN CODSIGAN SI DHAMMEYSTIRAN LOO BUUXIN, WAXA LAGU WEYDIISAN DOONAA INAAD BUUXISID MID CUSUB.**

- **CODSADAHA KOOWAAD** (Haddii aad ilmo aan qaangaadhin u codsanaysid, halkan gali **MAGACAAGA**, oo ilmaha ku qor ku-tiirsane Qaybta 2 ee hoose)

MAGACA HORE	MAGACA DHEXE	MAGACA DAMBE	TAARIKH DHALASHO	CAYN <input type="checkbox"/> LAB <input type="checkbox"/> DHEDIG	XAALAD GUUR
ADREES JID			MAGAALO	GOBOL	SUMAD (ZIP)
Ma tahay muwaadin Maraykan? <input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya			HADDAY HAA TAHAY, LAMBAR "SOCIAL SECURITY"	TELEEFON GURI	TELEEFON KALE

- **CID KALE MA KULA NOOSHAY?** Ma jiraa qof aad is Qabtaan iyo/ama kugu-tiirsane ku nool gurigaaga?  Haa  Maya – buuxi hoos

\* Waxa aanu u baahan ahay inaan tixgalino dakhliga qoyska oo dhan marka aanu ka fiirsanayno daryeelka Allina Partners Care. Haddii aad la nooshahay qof wehel kuu ah oo aad wadaagtaan ama isu leedihiin ilmo, waa inaad qofkaas iyo ilmaha ku qortid hoos oo ku kartid dhammaan macluumaadkooda dhakhliga.

MAGACA (Hore, Dhexe, Dambe)	Taariikh Dhalasho	Waxa Isu Tihiin	Muwaadin ama Dhalasho Maraykan? (Kaliya buuxin 2b hadday tahay <input type="checkbox"/> MAYA	2b Xaalad Imigarayshan?	2b Magaca Qabanqaabiye (Sponsor)
			<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya		
			<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya		
			<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya		
			<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya		
			<input type="checkbox"/> Haa <input type="checkbox"/> Maya		

**\*\* DUKUMENTIYADA CAYMIS CAAFIMAAD EE LA RABO \*\*:**

' HADDII QOF KU QORAN CODSIGAN AANUU HAYSAN DABBIRID CAAFIMAAD (MEDICAL ASSISTANCE, MN CARE, MEDICARE, AMA KALE): Fadlan keen sharaxaad qoran oo sheegaysa sababta caymis aan loo helin iyo warqad go'aamin oo sax ah oo hadda ah oo ka timid MN care oo ku saabsan qofkaas, ama dukumentu ku saabsan ka-reebitaan qodobada xeerka daryeel la iska bixin karo. **\*\*KOABI AH KAADHKA DARYEELKA CAAFIMAADKA AYAA LOO BAAHAN YAHAY IN LAGU SOO DARO.**

- **MACLUUMAAD CAYMIS CAAFIMAAD** Fadlan uga jawaab su'aalan soo socda naftaada, iyo waliba qof kasta oo aad ku qortay qaybta 2.

Fadlan keen sharaxaad qoran oo sheegaysa sababta caymis aan loo helin iyo warqad go'aamin oo sax ah oo hadda ah oo ka timid MN care oo ku saabsan qofkaas, ama dukumentu ku saabsan ka-reebitaan qodobada xeerka daryeel la iska bixin karo.

a. Ma haysataa Medicare? <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Part A <input type="checkbox"/> Part B	Qofka aad is Qabtaan/Wehelkaagu ma haystaa Medicare? <input type="checkbox"/> Maya <input type="checkbox"/> Part A <input type="checkbox"/> Part B
b. Qor caymiska caafimaadka ee hadda ee xubin qoys kasta oo ku qoran kor: (Tusaale: Jane Doe waxay haysataa Blue Cross Blue Shield)	(Halkan ku Qor Macluumaadka Caymiska)
c. Haddii xubno qoyska oo kor ku qoran aanay haysan caymis caafimaad, fadlan si kooban u sharax sababta.	(Sharaxaad)

**Fadlan soo dir koobi ah xagga hore iyo dambe ee kaadhka caymiska oo uu ku qoran yahay qof kasta oo uu dabbirayo caymiskaasi.**

**\*\*DUKUMENTIYADA XAQIJINTA MAALKA EE LA RABO \*\*:**

' WAA INAAD KEENTID WARAAQAHA UGU DAMBEEYAY EE XAQIJIJINTA BAAQIGA/QIIMAHA MAAL KASTA EE HOOS KU QORAN. WARAAQ KASTA WAA INUU SI CAD UGU QORAN YAHAY INAAD TAHAY MULKIILAHA MAALKA. "TAARIIKHDA WARAAQDA WAA IN LAGU QORO **SAFKA** a EE SHAXANKA HOOSE."

- **ADIGU (AMA QOFKA AAD IS QABTAAN/WEHELKAAGA, HADDII AY KU KHUSEYSO) MA LEEDAHAY MID KA MID AH NOOCYADA XIISAB BANGI (ACCOUNT) AMA MAAL?**

Xisaab Jeeg  Xisaab dhigasho  Kaadh "Pre-Pay Debit Card"  Maalgashi "stocks/bonds"  Cadeyn "Certificate of Deposit"  Xisaabo "Money Market"  Ma Leh Maal

(Buuxi hoos)

a. Taariikhda waraaqad ah dukumentiga xaqiijinta ee halkan la socda (BB/SS)	b. Magaca Mulkiilaha Maalka	c. Nooca Maalka	d. Magaca Bangiga ama Adeegga Dhaqaale
<i>Tusaale: 01/2016 (Jeeniwari 2016)</i>	<i>Jane Doe</i>	<i>Xisaab Jeeg</i>	<i>Bank of Allina</i>

**CODSIGU WUXU KA SII SOCDA DHINACA DAMBE**

**\*\* DUKUMENTIYADA XAQIJJINTA DAKHLIGA SHAQADA EE LA RABO\*\*:**

‘ KEEN (1) KOOBI AH QAYBTA DAMBE EE 2-DII JEEG MUSHAHAR EE UGU DAMBEEYAY EE KA YIMID SHAQO-BIXIYE KASTA IYO (2) KOOBI AH CASHUUR-CELINTAADII SANNADKII HORE OO AH FOOMKA CASHUURTA DHAKHLIGA EE FDERALKA (FEDERAL INCOME TAX FORM 1040)

**5a. MA SHAQEYSAA?**  Maya  Haa – Buuxi Hoos

**5b. QOFKA AAD IS QABTAAN/WEHELKAAGU MA SHAQEYAA?**

a. Magaca shaqaalaha shaqeeya	b. Magaca Shaqo-bixiyaha	c. Mushahar saacad/bil	d. Saacadaha la shaqeeyo todobaadkii	e. Baqshiish
		\$		\$
		\$		\$
		\$		\$

**\*\*DUKUMENTIYADA XAQIJJINTA DAKHLIGA ISKAA-U-SHAQEYSIGA EE LA RABO \*\*:**

‘ KEENI KOOBI AH CASHUURCELINTAADII SANNADKII HORE OO AH FOOMKA CASHUURTA EE DAKHLIGA FEDERALKA (FEDERAL INCOME TAX FORM 1040) OO AY KU JIRAAN QAYBAHA (SCHEDULES”)

**6a. ISKAA MA U SHAQEYSATAA?**  Maya  Haa – Buuxi Hoos

**6b. QOFKA AAD IS QABTAAN/WEHELKAAGU ISKII MA SHAQEYSTAA?**  Maya  Haa – Buuxi Hoos

a. Magaca Shaqaalaha Iskii u Shaqeysta	b. Magaca Ganacsiga	c. Taariikh Bilaabis	d. Dakhli Sannadkii (Laynka 12 ee foomkaaga 1040)
			\$
			\$

**\*\*DUKUMENTIYADA XAQIJJINTA ILLAHAAS DHAKHLI EE LA RABO \*\*:**

‘ SUGIDDA BULSHADA (SOCIAL SECURITY), SSI, BENSAN (PENSION), KAALMADA SHAQO-LA’AANTA, MAGDHOWGA SHAQAALAHA, KAALMADA

DAWLADDA: Soo dir cadeymaha anfacyada ama kaalmooyinka ama warqadda siinta oo muujinaya inta aad heshid bil kasta

‘ KOOBI AH WARAAQDA XISAABTAADA BANGIGA LOOMA AQBALAYO CADEYN DAKHLI.

‘ DHAMMAN ILLAHA DAKHLI EE KALE: Keen (1) dukumentiyada cashuur oo muujinaya dakhliga la helay, ama (2) nooc kale oo ah dukumentiyada xafiis oo xaqiijinaya dakhliga iyo meesha laga helay.

‘ KEENI KOOBI AH CASHUURCELINTAADII SANNADKII HORE OO AH FOOMKA CASHUURTA EE DAKHLIGA FEDERALKA (FEDERAL INCOME TAX FORM 1040) OO AY KU JIRAAN QAYBAHA (SCHEDULES)

**7. ADIGU (AMA QOFKA AAD IS QABTAAN/WEHELKAAGA, HADDII AY KU KHUSEYSO) DAKHLI MA KA HESHAA MEEL AAN AHAYN SHAQO?**

**KU DAR:**

- |                                      |                       |                |                     |                        |
|--------------------------------------|-----------------------|----------------|---------------------|------------------------|
| ‘ Sugid Bulsho (Social Security)     | ‘ Taageero La-is-qabe | ‘ Shaqo-la’aan | ‘ Dulsaar           | ‘ Taageero Ilmo        |
| ‘ Supplemental Security Income (SSI) | ‘ Magdhow Shaqaale    | ‘ Dakhli Kiro  | ‘ Lacag Saami       | ‘ Hawlgab/Benshan      |
| ‘ SSI Ilmo Aan Qaangaadhin           | ‘ Maal Laguu Maamulo  | ‘ Anfac VA     | ‘ Kaalmada Dawladda | ‘ Dakhli kale oo kasta |

Maya  Haa – Hoos buuxi

**\*\*\* QADDARADA KU QORAN SAFKA d. EE HOOSE WAA INAYSI SAX AH ULA MID YIHIIN DUKUMENTIYADA TAAGEERADA \*\*\***

a. Magaca qaataha dakhliga	b. Nooca dakhliga	c. Qaddarka	d. Inta jeer ee la qaato
		\$	
		\$	
		\$	

**8. HADDII CODSADUHU AANUU LAHAYN DAKHLI LA SHEEGAY, WAA IN LA BUUXIYO WARAAQ TAAGEERO. FADLAN SOO WAC XAFIISKAYAGA SI AAD HESHID KOOBI. HADDII AY JIRAAN QODOBO KALE OO AAD JECESHAHAY INAAN U TIXGALINO CODSIGAAGA, FADLAN HALKAN KU QOR. ISTICMAAL WARQAD DHEERAAD AH HADDII LOO BAAHDO.**

--

**9. \*\*\*\* KA HOR INTA AANAD SOO CELIN CODSIGAN, U HUBSO INAAD SOO RAACISAY DHAMMAAN DUKUMENTIYADA LA RABO OO AH SIDA KOR LAGU TILMAAMAY \*\*\*\***

Waxan qirayaa in macluumaadka ku qoran codsigan uu yahay run iyo sax marka la fiiriyo ogaanshahayga ugu fiican, waxana aan halkan Allina Health ugu oggolaanayaa inay siiyaan macluumaadkan cid kasta oo ah dhakhtar, xarun caafimaad, shuraako, iyo/ama cisbitaal ama xarun caafimaad oo ah aagga oo la ii gudbiyo. Waxa kale oo aan qirayaa inaan is qoro oo si buuxda u isticmaalo oo adeeco (1) barnaamijyo kasta oo ah Minnesota Health Care oo laga yaabo inay ii banaanaadaan, ama (2) caymis caafimaad oo kasta oo laga yaabo inaan ka heli karo shaqo-bixiye, suuqa caafimaadka "Health Exchange" (sida: MNsure), isla markaana haddii aan ka baaqdo inaan sidaas sameeyo waxa ka iman kara in la iga saaro Barnaamijka Daryeelka Allina Partners Care.

TAARIIKH	SAXEEXA CODSADAHAA KOOWAAD
TAARIIKH	SAXEEXA QOFKA LA IS QABO/WEHELKA

**FADLAN U SABIR 30 MAALMOOD OO AH KA SHAQEYN. WAXA OGEYSIISKA GO'AANKAYAGA LAGUUGU SOO DIRI DOONAA BOOSTA.**